Ku beegan wada hadlida xaalad caafimaad oo Skåne: ka war doonid habka loo noolyahay iyo lafa-gurid molekiyuulyada ku shaqo leh nolol oo caafimaad wanaagsan. Nooca G 240605.

Warbixin ku socoto dadka baaritanka ka qeybqaadan

Mashruuc cilmi baaritaan oo fiicneysiinta caafimaadka bulshada

DAdiga oo ka qeyb-qaadan wada hadalka caafimaadka oo Skåne waxaa xita ka qeyb-qaadankarta mashruuc oo cilmi baaritaan. Ujeedka baa ah in la helo aqoon cusub si loo fiicneysiiyo caafimaadka bulshada. Wada hadalka caafimaadka ma qaadan wakhti dheeri haddii aad ka qeyb-qaadaneysid mashruuca cilmi baaritanka.

Mashruuca cilmi baaritaanka waxaa ka dooneynaa inaa ka helno aqoon qoot dheer markey noqoto wada hadalka caafimaadka iyo xaqiijinta si loo hubiyo halista cudurada kala duwan. Si isbitaalka iyo goobaha daryeelka caafimaadka bixiyo ey mustaqbalka ugu fiicnaadan ka hortagida iyo daryeelida cudurada halista.

Mashruuca cilmi baaritaanka waxaa hoggaamin goobta la dhaho Centrum för primärvårdsforskning oo loo xilsaaray iney kaalmo siiyaan wada hadalka caafiimaadka markey noqoto talo bixin cilmi iyo qiimeyn suubin. Mashruuca waxaa iska leh gobalka Skåne[Region Skåne]. Mashruuca waxaa ansaxiyay hey'adda dhowrida anshaxa iyo akhlaaqda[Etikprövningsmyndigheten].

Habkee baa loo suubin mashruuca?

Haddii aad dooneysid inaa ka qeybqaadatid mashruuca cilmi baaritanka waxaa qasab ah inaa bixisid oggolaansho oo inaa dooneysid. Ka qeybqaadashada waa mid aad u madax bannaantahay iyo adiga xilliga aad dooneysid baa joojinkarta ka qeybqaadashada. Haddii aad tiraahdid maya ama aad dib ula noqotid oggolaanshada wax saameyn kuma yeelandoonto daryeelka caafimaadka lagu siin ama ka qeyb-qaadashada wada hadalka caafimaadka.

Cilmi baaritaanka ey suubin goobta Centrum för primärvårdsforskning wuxuu suurtagalin in lala soconkaro caafimaadkaada iyo sidii ahaan jiray iyo cudurada mustaqbalka oo laga soo helo meelaha diwaangalinta qaranka iyo gobalka. Anaga waxaa xita soo ururin inta jeer iyo nooca daryeelka lagu siiyay labo sano ka hore iyo labo sano kadib inta aadan bilaabin wada hadalka caafimaadka. Warbixinta lagaa helo marka aad joogtid wada hadalka caafimaadka (tusaale ahaan foomka su'aalaha, warbixinta oo habka aad u nooshahay, darajeynta caafimaadka iyo natiijada baarida dhiiga iyo waxyaabaha kale oo lagaa baaro) waa la soo ururin si lafa-gurid loogu suubiyo cilmi baaritan ahaan. Haddii wada hadalka caafimaadka sabab u noqdo in lagaa qaado baaritano dhacaan markas anaga waa ka qeybqaadan natiijada baaritanadas ilaa labo sano kadib markey kuu dhammaato wada hadalka caafimaadka. Si loola socon karo saameyn ey ku leedahay habka qofka u noolyahay caafimaadkiisa waxaa adiga si joogto laguugu martiqaadi inaa buuxisid hal ama dhowr foom oo looga wardooni xaaladaada sanadyada ka dabeeyo wada hadalka caafimaadka. Ka jawaabida foomka waa arrin qaadan 10 ilaa 15 minid. Ka jawaabida foomka su'aalaha waa arrin aad u madax bannaantahay sida camal mashruuca cilmi baaritaanka.

Goobaha caafimaadka qaarkood waxey dhacaan u qaadi cilmi baaritaanka. Adiga oo goob caafimaad ka qeybqaadan waxaa cilmi baaritanka lagaaga qaadi dhalo dheeri oo dhiig, 40 ml (qiyaasti 2,5 qaado cunto), oo ka hore wada hadalka caafimaadka. Cirbad durid oo dheeri ma lagugu suubin. Dhiiga waxaa lagu keydin bangiga dhiigta oo gobalka Skåne mas'uulka ka tahay, si wakhti kale baaritan loogu suubinkaro. Inta kale markey noqoto wada hadalka caafimaadka sida caadiga baa loo suubin iyo mashruuca cilmi baaritanka ma dooneysid inaa wax kale dheeri suubisid.

Dhammaan warbixinta waa la qarin iyo baaritan lagu suubin iyo natiijada la soo bandhigi si anaan loo kala garan karin dadka, oo adiga shaqsiga aad tahay warbixintas ma ka dhex muuqaneyso. Shaqaalaha aad la leedahay wada hadalka caafimaadka ama shaqaalaha goobta daryeelka caafimaadka marnaba ma la qeybsaneyno warbixinta ey soo ururiso cilmi baaritanka ama meelo kale ka diwaangalisan.

Ku beegan wada hadlida xaalad caafimaad oo Skåne: ka war doonid habka loo noolyahay iyo lafa-gurid molekiyuulyada ku shaqo leh nolol oo caafimaad wanaagsan. Nooca G 240605.

Saameynta iyo halista ey yeelankarto ka qeybqaadashada mashruucan

Wax halis haddii ey noqoto jirka ama maskaxiyan ma jirto markey noqoto ka qeybqaadashada mashruucan oo cilmi baaritanka, inta aanan ka eheen qofka inuu dhibsado cirbada lagu duri marka dhacaanka dhiiga laga qaadi maadaama ey wakhti ey qaadan dhiig qaadida. Laakin mar dheeri ma lagu duri oo xilliga dhacaanka caadiga lagaa qaado baa dhacaanka cilmi baaritanka xita lagaa qaadi.

Halista u baahan markasto in lagu xisaabtamo waa isticmaalida warbixinta shaqsiga iyo in dhicikarto in la xado warbixintas. Laakin in arrintas ey dhacdo waa halis aad u yar maadaama Centrum för primärvårdsforskning ey howl culus ka qabteen ilaalinta iyo daryeelida warbixinta cilmi baaritanka iyo ey suubsadeen nidaam ku waafaqsan sharciga ilaalinta sirta.

Warbixinteyda sidee baa loo isticmaali?

Mashruuca habkaan buu u soo ururin iyo u diwaangalin warbixinta adiga shaqsiyan ku quseyso:

- Goobta qeybta diwaangalinta tayada oo Wada hadalka caafimaadka oo Skåne: dhammaan wixii warbixin oo wada hadalka caafimaadka markey internetka noqoto (sida foomka su'aalaha aad ka jawaabtid, natiijada baarida dhacaan dhiig iyo cabirada, cudurada kale ku haayo, xaalada caafimaadka, wax yaabaha laguu qabtay iyo qorsheysan), jawaabaha su'aalaha dib u qiimeynta xaalada.
- Baaritaano qaas u ah cilmi baaritanka haddii horeyba lagaaga qaadin: hannaanka layska dhaxlo iyo saameynta bayada iyo dhaxalka, nafaqooyinka jirka dhiso, habka jirka nafaqada u qaato.
- Guddiga caafimaadka bulshada[Socialstyrelsen] diwaangalinta arrimaha caafimaadka: *Daryeelida caafimaadka furan iyo kuwa qasabka[Sluten- och Öppenvårdsregister]* (xilliga cudurka/nooca cudurka), *Diwaangalinta dhimashada[Dödsorsaksregistret]* (xilliga geerida/sababta keentay dhimashada), *Diwaangalina kaansarka[Cancerregistret]* (la ogaaday cudurka kaansarka, xilliga cudurka), *Diwaangalinta daawoyinka[Läkemedelsregistret]* (daawooyinka qofka loo qoray, inta jeer loo qoray/la soo baxay daawo), *Xaalada caafimaad xilli fool[Medicinska födelseregistret]* (warbixin xaalad caafimaad oo xilliga uurka iyo foosha).
- Xafiiska suubinta tiro koobida[Statistiska Centralbyrån] heer shaqsi: *Diwaangalinta bulshada markey noqoto[Registret för totalbefolkningen]* (guur iyo muwaadin), Diwaangalinta dhowr jiil[*Flergenerationsregistret]* (warbixin abtiris), *Longitudinell integrationsdatabas* (warbixin habka bulshada u nool yahiin, dhaqaale iyo nolol ahaan), *Warbixin juquraafi[Geografiska koordinater]* (SAMS, DeSO: oo warbixin qofka xaafada ku noolyahay iyo goobta ka shaqeeyo meelaha ey ku yaalan).
- Diwaangalinta tayada ilkaha[Svenskt kvalitetsregister] oo daryeelida ilkaha (SKaPa): warbixinta caafimaadka ilkaha.
- Diwaangalinta qaranka[Riksarkivet/Rekryteringsmyndigheten]: askari qorid.
- Gobalka Skåne[Region Skåne] diwaagalinta u adeegida bulshada(PASiS, PRIVA, RSVD, journalsystem): cudurada iyo taariikhda, u gudbinta daryeel caafimaad, xilliyada daryeel la siiyay (inta jeer iyo nooca) iyo natiijada dhacaamada baaritaanka.
- Haddii adiga aad ka qeybqaadaneysid mashruuc kale oo cilmi baaritan oo la dhaho Livsstilsverktyget halkas xita waan ka soo qaadan warbixin: haddii haa/maya, iyo ilaa heerka aad isticmaashay mashruucas qabalka digitaalka. Anaga waxaan dib u badali doona warbixintas qaarkood, laakin ma ka qeybqaadan doono warbixintada kale oo qalabka Livsstilsverktyget.

Dhammaan warbixin adiga ku quseyso aan meelaha kala duwan ka soo ururino sida wada hadalka caafimaadka, natiijo dhacaan dhiig iyo warbixintada kale marka aan diwaangalineyno waxaan u suubin labar qaas ah oo lambarkada dhallashada kuma qornaan doono. Warbixinta la soo ururiyay iyo lambar qaas loo yeelay waxaa lagu keydin internetka jaamacada Lund. Internetkas waa mid dab iska difaacikaro iyo ma'ahan meel qof shaqsi gali karo. Warbixintan waxaa kaliya isticmaali karo dhowr qof, shaqaalaha tiro koobid suubinta iyo cilmi baarayaasha oo mashruuca ka shaqeyn. Cilmi baarayaasha waxaa la siin warbixinta oo lambarka qaaska loo yeelay marka ey ansaxnimo ka helan guddiga maamulka oo hoggaamin mashruuca iyo taliyaha cilmi baaritanka.

Ku beegan wada hadlida xaalad caafimaad oo Skåne: ka war doonid habka loo noolyahay iyo lafa-gurid molekiyuulyada ku shaqo leh nolol oo caafimaad wanaagsan. Nooca G 240605.

Hal shuruud baa ah in warbixinta loo isticmaalo sida ku qoran warbixnta cilmi baaritanka. Cilmi baaritanka waxaa xita ka qeybqaadan shaqaalaha kaalkaalisada cilmi baaritanka oo shaqaalahas wuxuu hubin in warqada ogoolaansho bixinta laga helay dadka iyo si sax loo soo buuxshay iyo si sax loogu diwaangaliyay kombiyuutarka isbitaalka iyo daryeel caafimaad bixinta. Hubinta tayada shaqada waxaa kaliya la suubin haddii la dhowri karo sir ilaalinta.

Anaga qorshaheena baa ah inaa bilaawno isticmaalka warbixinta iyo lafa-gurida warbixinta muddo gaari 10 sano. Mashruuca wuxuu ku saabsanyahay cudur qofka nolosha dib uga dhaco. Sidaas daraadeed baa marka 10 sano koowad ey dhammaato u codsan in oggolaansho nala siiyo si aan baaritan iyo lafa-gurid ugu suubinkarto warbixinta iyo natiijada cilmi baaritanka ilaa muddo gaari dhammaan 50 sano, oo taasna micnaheeda tahay in qofka ugu da'da yar 90 sano ka buuxin.

Ujeedka loo isticmaali warbixinta shaqsiga baa ah in cilmi baaritaan lagu suubsho arrimaha sababta u noqdo cudurada caadiga ah iyo kuwa halista ah. Sharciyan markey noqoto midoowga yurub iyo ilaalinta warbixinta shaqsiga oo kombiyuutarada waa arrint danta guud bulshada ku jirto maadama ujeedka yahay fiicneysiinta caafimaadka bulshada.
Jawaabahaada iyo natiijadaada waxaa loo isticmaali doono si qof aanan ku shaqo laheen ka qeybqaadankarin. Gobalka Skåne baa mas'uulk ka ah warbixintaada shaqsiga. Sida sharciga midoowga yurub ku qoran adiga xaq baa u leedahay in warbixinta aan kaa hayno oo mashruuca isticmaali kula qeybsano si bilaash iyo wixii qalad saxno. Adiga waxaa xita soo codsankarta in warbixintaada shaqsiga aan tirtirno ama inyar oo xad leh ka isticmaalno. Haddii aad dooneysid inaa warbixintaada ka qeybqaadatid waxaa la soo xiriiri qofka mas'uul ka ah mashruuca, warbixinta hoostan ka fiiri. Gobolka Skånes wakiilka difaacida warbixinta shaqsiga[dataskyddsombud] soo wac telefoonka: 044-309 30 00, e-mailka: region@skane.se. Haddii aadan ku qanacsaneen sida loo isticmaali warbixintaada shaqsiga adiga waxaa xaq u leedahay inaa dhacwo usoo dirsatid Hey'adda ilaalinta qofnimada[Integritetsskyddsmyndigheten], oo ah hey'adda sugida ilaalinta nidaamka.

Dhacaamada la iga qaado maxaa lagu suubin?

Dhacaamada lagaa qaado markey noqoto mashruuca oo laga qaado rugta caafimaadka qarkood waxaa loo yeeli lambar iyo lagu keydin gobolka Skåne bangiga dhacaamada[Region Skånes biobank], haregistreringsnummer 136, i Lund. Gobolka Skåne baa mas'uul ka ah dhacaamka. Adiga xilliga aad dooneysid baa dib ula noqonkarta oggolaanshadaada. Markasna dhacaankaada waa la xoori ama lambarada lagu garan la'ahaa qofka iska leh baa laga tirtiri. Haddii aad dooneysid inaa dib ula noqotid oggolaanshadaada la soo xiriir qofka mashruuca mas'uulka ka ah, warbixinta hoostan ka fiirso. Dhacaanka waxaa loo isticmaali habka aad oggolaatay in loo isticmaali. Haddii ey soo baxdo baaritanka cusub aan hada qorsheysneen waa in koow Hey'adda [Etikprövningsmyndigheten] ogaamiso haddii adiga dib mar kale lagu weydiisan oggolaansho.

Sidee baa aniga ku heli warbixinta oo natiijada mashruucan?

Natiijada waxaa lagu soo qori joornaalada cilmi faafinta, ogeysiinta idaacadaha iyo warbixintada kale aan qorno. Marka aan warbixino noocas faafin warbixinta waa mid koox ahaan oo lama kala saari karo shaqsiyada. Mashruuca oo cilmi baaritanka wuxuu la xiriira wada hadalka caafimaadka. Wixii dheeri ah oo baaritan caafimaad la suubin ama daawo/daryeel lagu siin waxaa ku shaqo leh rugta caafimaadka.

Ceymis iyo magdhabid

Dadka oo ka qeybqaadan wada hadalka caafimaadka oo Skåne waxaa ku shaqo leh ceymiska guud oo buukan jiifka markey noqoto qeybkasto oo wada hadalka caafimaadka ka mid ah, sida camal foomka s'uaalaha, baaritaanada, dhacaan qaadida iyo wada hadalka. Qofka wax magdhabid ma la siin haddii lacag shaqo ey dhaafto.

Ku beegan wada hadlida xaalad caafimaad oo Skåne: ka war doonid habka loo noolyahay iyo lafa-gurid molekiyuulyada ku shaqo leh nolol oo caafimaad wanaagsan. Nooca G 240605.

Ka qeybqaadashada waa mid aad u madax bannaantahay

Adiga waa u madax bannantahay ka qeybqaadashada iyo xilliga aad dooneysid baa joojinkarta qeybqaadashada. Haddii aadan dooneyn inaa ka qeybqaadatid ama dooneysid inaa joojin ka qeybqaadashada ma ubaahnid inaa sabab sheegtid, iyo wax saameyn ma ku yeelaneyso daryeelka caafimaadka ama daaweynta aad heli doontid.

Haddii aad dooneysid inaa joojisid ka qeybqaadashada waxaad la soo xiriiri qofka mas'uulka ka ah cilmi baaritanka, fiiri warbixinta hoostan.

La soo xiriir

Mas'uuliyaha mashruuca waa:
Kristina Sundquist, professor, dhaktarka xaafada[distriktsläkare]
Centrum för primärvårdsforskning
Clinical Research Centre, CRC, Malmö
Telefoon: +46 (0)40 391 376
E-mailka: kristina.sundquist@med.lu.se
Internetka: cpf.se

Annan kontaktperson:
Emelie Stenman, docent, isku daba rida aha cilmi baaritanka[forskningskoordinator]
Centrum för primärvårdsforskning
Clinical Research Centre, CRC, Malmö
Telefoon: +46 (0)40 391 380
E-mailka: emelie.stenman@med.lu.se

Frågor om blodprov och biobank:
Anna Hedelius, dhacaan baari[biomedicinsk analytiker]
Centrum för primärvårdsforskning
Wallenberglaboratoriet, Malmö
Telefoon: +46 (0)40 331 473
E-mailka: anna.hedelius@med.lu.se